ISMAAMULKA
SAN DIEGO



BARNAAMIJKA ILAALINTA WARAHA BIYAHA

# Tababar Shaqaalahaaga



Barnaamijka ***Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego*** ayaa ka taageeraaya ganacsiyada dedaaladooda kahortaga wasaqda asagoo siinaaya Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka Biyaha Daadka (BMP-yada).

Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, mijaroorada, iyo biyaha daadka roobka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, iyo badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka. ***Tilmaamahaan kormeerka shaqaalahaaga ayaa naga caawin doona nadiifinta marinadeena biyaha.***

## Tababarka Shaqaalaha ee sanadlaha ah

- Samee tababarka sanadlaha ah si loo xaqiijiyo in shaqaaluhu yaqaanaan sida la loo dabaqo BMP-yada daadka iyo kahortaga wasaqda oo ay ku darayaan hawlahooda joogtada ah.
- Tababarka sanadlaha ah ayaa laga doonayaa shaqaalaha fulinaaya Qorshaha Kahortaga Wasaqda Biyaha Daadka (SWPPP) tababarkuna waa inuu ku filan yahay xaqiijinta ku dhaqanka sharciga WPO.
- Hel oo calaamadee marinnada biyaha daadka oo ku yaala qariirada kuna dhaji aaga guud ee shaqada. Tus shaqaalahaaga meesha albaabadu ku ooli doonaan.
- Bar shaqaalaha munaasabada inay si sax ah u adeegsadaan agabka iyo qalabka nadiifinta waxyaabaha daata.
- Qor dhammaan tababarka; ku dar mawduucyada laga hadlay, taariikhda, iyo magacyada macalinka iyo ardayda.
- Hayso diiwaannada tababarka shaqaalaha iyo liiska hubinta kormeerka iskaa ah ee goobta una diyaari dib u eegista kormeeraha.

waan
**difaaci karnaa**
**marinadeena biyaha**

ayadoo la qaadayao keliya
**dhawr talaabo.**

*tilmaamo dheeraad ah >>>*

*Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.*

JANAAYO 2022

# Tababar Shaqaalahaaga







## Waxbarashada iyo Talaabada Sixida ah ee Sii socda.

- Sii talaabo sixitaan ah mar kasta oo farsamo qashin fogayn sharci daro ah dhacdo.
- Ka qaybgal kulannada ganacsiga ama kooxda warshada ee xogta la isku dhaafsanaayo.
- Ku boori shaqaalaha inay fikir ka dhiibtaan fikradaha tababarka iyo mawduucyada.
- Ku boori shaqaalaha inay soo sheegaan tuubooyinka dilaacsan, qasacyada waxyeeladu ku dhacday, iwm.
- Dhaqan geli barnaamijka abaal marinta ee lagu baxsho fikradaha yaraynta wadaqda biyaha ee ay soo diraan ayna dhaqan gashaan shaqaaluhu.

**Ku siidaynta wasaqda si toos ah ama si dadban nidaamka biyaha roobka qaada ama marinnada biyaha waxay kasoo horjeedaa Xeerka Ilaalinta warta biyaha ee Ismaamulka (WPO).** ***Ganacsigaaga waxaa laga doonayaa inuu ku dhaqmo WPO iyo shuruudaha kore ee ugu yar ee BMP-yada.***

waan
difaaci karnaa
marinadeena biyaha
ayadoo la qaadayao keliya
dhawr talaabo.

## Waad ku mahadsan tahay
inaad doorkaaga ka qaadatay difaacida kanaaladeena biyaha.

*Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.*